

Safarada caafimaadka

Warbixinta bukaanka iyo ehelka



Waxaad buuggan yar ka akhrisan kartaa qawaaniinta khuseysa safarada goobaha daryeelka caafimaadka.

Khawaaniintan ayaa khuseeya dhamaan dadka ku nool kana diiwaan gashan gobalka Sörmland haystana dhalashada iswiidhiska, ama u dhashay dal heshiis kula jira Iswiidhen. Khawaaniintan ayaa sidoo kale khuseeya dadka magangalyo doonka ah, kuwa warqad la'aanta ah iyo kuwa dhuumaalaysanaya.

Ayaa xaq u leh safarka caafimaadka?

Siyaabo kala duwan ayaa loogu safri karaa loogana soo noqon karaa goobaha daryeelka caafimaadka. Haddii aad ku safri karto gaari gooni loo leeyahay ama gaadiidka dadweynaha, adigaa diyaarsanaya mas'uulna ka ah safarkaa. Haddii aadan iska dabari karin safarka sababo caafimaad dartood waxa jira fursad lagu raaco gaadiidka dadweynaha ee khaaska ah.

Xaaladda caafimaad aad ku sugan tahay ayaa go'aan ka gaaraysa qaabka aad ku safri karto waxayna mas'uuliyadda qiimaynta xaaladaada caafimaad ee jir iyo maskax ahaan saaran tahay shaqaalaha caafimaad ee aad daryeelka ka helayso. Inaanu jirin gaadiid dadweyne ma noqonayso sabab xaq kuu siinayso isticmaalka gaadiid dadweyne ee khaasa

Si aad awood ugu yeelato inaad ka dalbatid safar caafimaad xarunta dalbashada waa in cadaynta safarka caafimaad ee shaqaalaha caafimaadka loo diray waaxda safarada caafimaad si ay u diiwaan geliyaan ugu danbayn sadax maalmood kahor taariikhda safarkaada.

Gaadiid dadweyne khaasa, safar caafimaad

Had iyo jeer gacanta ku hayso macluumaadka soo socda markaad ballansanayso safar:

- Tobanka lambar
- Lambar telefoon
- Adareeska saxda ee lagaa qaadayo/lagu gaynayo
- Warbixinta cidda ku wehlinaysa ama kula socota
- Shandado kale haddii ay jiraan

Sidan u dalbo safarka:

- Ka wac xarunta dalbashada telefoonka: **020-44 40 00**
- Waxaad dalban kartaa ama baajin kartaa safarka saacad kasta.
- Sheeg wakhtiga lagaa rabo adareeska. Wakhti hore sii tag goobta caafimaad ee aad booqanayso.
- Xaaladaha daryeelka la qorsheeyay ballanta safarka sii qabso wakhti hore balse ugu badnaan 14 maalmood kahor maalinta safarka.
- Waa muhim inaad diyaar tahay markuu gaarigu yimaado.

Safarkan ayay musaafiriin kale qayb ka yihiin, markaa wakhtiga safarka iyo sugitaankaba ayay taa saamayn kartaa. Safarka ayaa loo isticmaali karaa gaari yar ama gaari khaasa oo ku qalabaysan sagxad hoose si gaariga loo galo.



Gunada safarka gaari gooni loo leeyahay iyo gaadiidka guud ee dadweynaha

Safarada gobalka gudihiisa waxa lacag lagu bixiyaa haddii aad leedahay wax ka badan sideed jeer oo daweyn ah oo aad ka hesho hal goob daryeel caafimaad ama waax daryeel ilko muddo afar todobaad ah oo xiriira. Waxaad sidoo kale gunada aad heli kartaa haddii aad buuxiso shuruudaha safarka ee gaadiidka dadweynaha khaaska ah ama aad leedahay adeegga safarka ”färdtjänst” balse aad ku safarto gaadi gooni loo leeyahay.

Safarada ka baxsan gobalka waxa lacagtooda la bixiyaa marka lagu gudbiyay daryeel takhasus ansaxa/isku xir lacag bixinta gobalka Sörmland.

Si laguugu soo celiyo gunada waa inaad waaxda safarada caafimaadka u dirtaa risiidhka booqashada iyo wixii tigidh tareen iyo basa ee jira oo orijinaal ah. Waxan bixinaa oo kaliya gunada booqashada 12-kii bilood ee ugu danbeeyay.

Gunada ayaa lagu soo dirayaa tobankaada lambar, laguma soo dirayo lambarka akoonkaada, waxana lagu soo dirayaa bangiga uu gobalku heshiiska la galay. Khidmad 50 kr ayaad bixinaysaa haddii aad gunada qaadan waydo wakhtiga loogu tala galay maadaama lacag cusub lagu soo dirayo. Adigay ku saaran tahay mas’uuliyadda in la hayo warbixintaada oo saxa. Haddii kale, waxay noqonaysa inaad gunada dib u soo celiso.

Safarada dhaca maalin aan ahayn tan dawaynta waxa lacagtooda la helayaa oo kaliya haddii ay jirto sabab caafimaad ee keenaysa inuu safarku dhaco maalin kale ama haddii aysan suura gal ahayn in la qaato gaadiidka guud ee dadweynaha.

Xusuusnow in gunada safarka caafimaadka mar kasta loo eego adareeska aad ka diiwan gashan tahay.

Khidmada kugu soo aaday

Khidmada kugu soo aaday waa kharashka aad adigu bixinayso. Waxaa taa laga jarayaa gunada lagu soo dirayo iyadoona lagu kordhinayo kharashka ka gaashaamashada sare taasoo ah 1 800 kar. Taa ayaa laga xisaabinayaa maalinta koowaad ee safarka iyo 12 bilood oo ku xigta.

- Gunada lagu bixiyo gaari gooni loo leeyahay waa 2,50 kr/km iyadoo khidmada kugu soo aadaysana ay tahay 100 kr/safarka hal dhinaca.
- Gunada bas/tareen waa kharashka tigidhka iyadoo khidmada kugu soo aadaysana ay tahay 100 kr/safarka hal dhinaca.
- Gaadiidka dadweynaha khaaska ah, safarka caafimaadka 150 kr/safarka hal dhinac
- Musaafiriinta ay laba qof wehliyaan ayaa helaya 150 kr/ safarka hal dhinac oo dheeriya

Wehel

Qofka ka weyn 18 sanno isla markaana sabab caafimaad darteed u baahan wehel waa inuu mar kastaa taa oggolaansho ka keenaa shaqaalaha caafimaadka. Qofka ku safraya gaadiidka dadweynaha ee khaaska ah waa inuu wataa caddaynta safarka caafimaadka. Safarada gawaarida goonida loo leeyahay ama gaadiidka dadweynaha waxa lagu caddaynayaa risiidhka daryeelka caafimaad.

Carruurta ay da'doodu ka yar tahay 18 sanno waxay mar kasta xaq u leeyihiin inuu la socdo qof ehela oo aan kharash dheeradda bixin xilliga ay ku safrayaan gaadiidka guud ama khaaska ee dadweynaha. Haddii ay jirto baahi laba wehel/qaraabo xilliga loo safrayo gobal kale waa in baahidaa ay soo caddeyso rugta caafimaadka ee qofka soo gudbisay.

Safarka qaabilaadda degdega ama dhalmada

Markaad ku safarto gaari gooni loo leeyahay ama tagsi caadi ah adigoo u socda qaabilaadda degdega gunada ayaa lagu soo celin karaa. Safarka guriga ee gaari gooni loo leeyahay waxa gunadiisa la soo celiyaa oo kaliya haddii ay jirto sabab caafimaad taasoo lagu caddeynayo risiidhka bukaan socodka ay bixiyaan shaqaalaha caafimaadka. Haddii ay jirto sabab caafimaad markaa waxa safarka caafimaadka diyaarinaya shaqaalaha caafimaadka, haddii kale adigaa iska bixinaya mas'uulna ka ah safarkaa guriga.

Kuraaska gaariga ee carruurta yar yar ilaa kuwa jira 6 bilood laguma bixiyo gaadiid khaasa ee dadweyne.

Daryeelka degdega meel ka baxsan gobalka

Gunada safarka ayaa lagu bixiyaa safarka xarunta caafimaad ee kuugu dhow gobalka aad ku sugan tahay. Safarka soo noqoshada waxaa lagu bixiyaa halkuu safarka caafimaadku ka bilowday. Safarka adareeska aad ka diiwaan gashan tahay kharashkiisa adigaa mas'uul ka ah mana laga dalban karo xarunta dalabka.

Daryeelka iyo daweynta baaqata

Markaad kharash ku bixiso safar goob daryeel iyo dawayn isla markaana uu baajiyo daryeel bixiyaha, waxa kharashka safarka bixinaya waaxdaa daryeelka caafimaad.



Hoy ka baxsan gobalka

Marka lagu oggolaado inaad dagto hoteel bukaan socod ama hoteel ay kuu qoondaysay waaxda bixinsaysa daryeelka caafimaad waxa laguugu soo dalacayaa 130 kr/maalinti ee khidmada kugu soo aaday ah. Khidmadaa kuma jirto tan ka gaashaamashada kharashka sare. Degaanka dadka kale ee ku wehliya wuxuu u baahan yahay caddeyn ka timid rugta caafimaad ee ku soo gudbbisay. Caddeynta ayaa loo dirayaa waaxda safarka caafimaad kahor intaanay dhicin booqashada caafimaad. Degaanka bukaan socodka ka yar 18 sanno iyo hal qof oo qaraabaa ayaa lacag la'aan ah.

Haddii ay jirto sabab khaasa isla markaana ay rugta caafimaadka ee ku soo gudbisay oggolaatay hoyga laba qof oo qaraabaa waa inay soo caddeysaa rugta caafimaadka.

Safarada aan la oggolayn ama lacag la isu soo celin

Safarada la xiriira:

- Daryeel caafimaad ee ka hortag ah
- Tallaalo
- Daryeel caafimaad shirkadeed
- Safarka guriga xilliga laga yimaado qeybta dhalmada
- Fasax qofku isagu doortay
- Doorashada caafimaad ee xorta (xoriyadda doorashada)
- Safarada ka baxsan Iswiidhen
- Markaan la hayn rasiidh bas/tareen
- Safar tagsi daryeel qorsheysan oo aan laga dalban xarunta dalabka

Kharashka baarkeerinka iyo canshuurta waddada lacag la isuma soo celiyo.

Adiga u baahan kormeer caafimaad waxa lagu tilmaamayaa gaadiidka ambalaaska.

**Sjukreseenheten
Region Sörmland
611 85 Nyköping**

**Telefon 0155-24 73 57
Telefontid vardagar 9.30–11.30, 13.00–14.30**

E-post: sjukreseenheten@regionsormland.se

Mer information: www.regionsormland.se/sjukresor